
# Natiijooyinkaaga Baaritaanada Qaaxada (TB)
# Waa maxay sababta ay muhiim u tahay inaad haysato natiijooyinkaaga baaritaanada?



## Waa maxay sababta aan uga baarno shaqaalaha cusub Qaaxada TB?

Baaritaanka Qaaxada (TB) waa shardi lagama maarmaan u ah helitaanka shatiga xarumaha daryeelka, oo ay ku jiraan guryaha daryeelka lagu bixiyo. Shaqaalaha goobaha daryeelka caafimaadka waxaa laga baaraa qaaxada ka hor inta aysan la shaqayn bukaannada ama macaamiisha.

Ujeeddooyinka baaritaanka waa 1) in si dhaqsa ah loo ogaado loona gudbiyo dadka qaba TB-da firfircoon (jiran/qaadsiin kara cudurka dadka kale) iyo qodobka 2) in la ogaado lana sii hormariyo daaweynta dadka qaba TB-da qarsoon (aan jiran/aan cudurka qaadsiin karin dadka kale).

## Maxaa ka mid ah baaritaanka?

**Taariikhdaada halista TB-da:** Haddii baaritaanadii hore lagu ogaaday TB ama TB-da qarsoon (LTBI). Haddii aad qabto xaalad hoos u dhigta difaaca jirka oo saameyn karta natiijada baaritaanka. Haddii hore laguu siiyay tallaalka Bacille Calmette-Guérin (BCG) (taas oo sababi karta natiijo khaldan oo ka dhalatay baarista maqaarka). Haddii aad muddo ka badan laba bilood ku nooleyd waddan TB-da ku badantahay, ama haddii aad xiriir dhow la lahayd qof hore u qabay TB baaristaadii hore kadib.

**Calaamadaha iyo astaamaha TB-da firfircoon:** Qufac joogto ah oo soconaya 3 toddobaad ama ka badan, xabad xanuun ama neefta oo kugu yaraata, miisaan dhimis aan la garanayn sababteeda, dhidid habeenkii ah, qandho, daal, cunno xumo, qandho ama qabow. Astaamo kale ayaa jiri kara iyadoo ku xiran meesha cudurku jirka ooga dhacay.

**Baarista TB-da:** hal IGRA (interferon gamma release assay) baaritaanka dhiigga ee lagu ogaado **caabuqa qaaxada (TB), waa** baaritaan dhiigga ah oo laba heer ah (baaritaanka maqaarka ee Mantoux tuberculin). Haddii aad ka walaacsan tahay in tallaalkii hore ee BCG uu saameyn ku yeelan doono baarista ama horay waxyeelo kala kulantay baarista, waa inaad martaa baaritaanka dhiigga ee TB-da.

## Maxaa dhacaya haddii baaristaydu sheegto cudurka?

Dadka shaqada bixiya waxay daboolaan kharashaadka baaritaannada ee loo baahan yahay sida (baarista TB, raajada xabadka). Qof kasta oo baaristiisu sheegto cudurka TB-da, wuxuu u baahan doonaa inuu qaato raajada xabadka (CXR). Haddii baarista TB laga waayo, waxaad bilaabi kartaa shaqada daryeelka macaamiisha.

Dadka shaqada bixiya mas'uul kama aha kharashaadka kale ee dhakhtarka haddii loo baahdo. Haddii aad leedahay calaamado ama raajadaada ay muujiso wax aan caadi ahayn, waa inaad la xiriirtaa dhaqtarka si loo hubiyo inaadan qabin TB-da firfircoon. Xasuusnow haddii baaristu sheegto inaad qabto TB-da qarsoon, daaweyntu waxay kaa caawin kartaa in laga hortago in cudurku mustaqbalka kugu sii fido.


## Ka warran haddii baaristu horay u sheegtay inaan qabo TB?

Hayso natiijooyinkaaga baarista! Haddii aad haysato dukumeenti muujinaya in horay lagaaga helay cudurka, looma baahna in dib laguu baaro. Haddii aad sidoo kale haysato raajo xabadka ah in qaaxada lagaa waayay ama baaristu ay sheegayso in cudurkii lagaa helay taas oo la qaaday 90 maalmood ka hor taariikhda baarista, ama waqti kasta oo ay baaristu sheegto in cudurka lagaa helay, markaas looma baahna raajo cusub. Dhammaan shaqaalaha laga helo qaaxada waxay mari doonaan baaritaan sanadle ah ilaa aad keento caddeyn inaad dhamaysatay daawada qaaxada ama qaaxada qarsoon (LTBI).





# Natiijooyinkaaga Baaritaanada Qaaxada (TB) Waa maxay sababta ay muhiim u tahay inaad haysato natiijooyinkaaga baaritaanada?



## Ka warran hadii aan dhawaan baarista dhamaystay?

Natiijooyinkaaga hayso una sheeg cidda ku shaqaalaysiisay! Waaxda Caafimaadka ee Minnesota iyo la hawlgalayaasheeda waxay ku dadaalayaan in la helo hab sahlan oo natiijooyinka baaritaanada TB-da loogu gudbin karo shaqaalaha daryeelka caafimaadka si looga fogaado baaritaanno is-dulsaaran oo aan loo baahnayn. Balse, arrintan waxay u baahan tahay in dhammaanteen aan qayb ka noqono.

Adiga ayaa leh masuuliyadda inaad xafidato natiijooyinka baarista mar kasta oo aad marto baaritaanada TB-da. Haddii aan lagu siin natiijada, weydii. Waa xogtaada caafimaad, xitaa haddii aadan bixinin qarashka baaritaanka, waa in lagu siiyo nuqulka natiijada. Meel fiican dhigo nuqulada natiijooyinka baarista taas oo ay bixiyaan shaqo bixiyayaasha (ama iskuulada).

Natiijooyinkaaga meel ammaan ah ku hay, oo diyaar u noqo inaad la wadaagto shaqo kasta oo cusub. Natiijooyinka aan sheegayn TB-da waxay ansax yihiin muddo kooban. Had iyo jeer kaydi natiijada ugu dambeysa. Natiijooyinka sheegaya inaad cudurka qabto waqtigoodu ma dhaco, marka si fiican u kaydso nuqulada raajooyinka baaritaanada.

## Ka warran hadii aan lumiyo natiijooyinkayga baarista?

La xiriir cidii aad markii hore u shaqeenaysay si aad u hesho nuqulka natiijooyinkaagii qaaxada ee ugu dambeeyay. Haddii aad rabto in natiijooyinka si toos ah loogu diro shaqaalaysiiyaha cusub, waxay u baahan doonaan inaad saxiixdo foom oggolaansho ah.

Haddii baaritaanku ka dhacay rugcaafimaad, waxaad xaruntaas ka codsan kartaa nuqulka diiwaankaaga caafimaadkaaga.

## Khayraad

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qaaxada (TB) waxaad ka heli kartaa bogga Waaxda Caafimaadka ee Minnesota: www.health.mn.gov/tb

**Minnesota Department of Health**
**Health Regulation Division**
**Planning and Partnership**
**625 Robert Street North**
**PO Box 64975**
**St. Paul, MN 55164-0975**
**www.health.state.mn.us**

## Shaqaalaha Daryeelka Caafimaadka waa Mahadsan yihiin!



09/25/2025